

## **Amaahda qalabka shaqada fududeeya**

Adigu waxaad Hjälpmedelscentralen ka amaahatay hal ama dhowr qalabkan ah. Xilliga mudada amaahda adiga ayaa mas'uul ka ah daryeelka iyo nadiifinta joogtada ah. Qalabka shaqada fududeeya waa amah qof ku xiriirsan oo ma la ogola in lagu wereejiyo qof kale. Daryeel la'aanta qalabkan shaqada fududeeya waxay keeni kartaa in ay khasab kugu noqoto inaad dib u soo celiso iyo mararka qaarkood inay ku waajibayso magdhabid. Adiga ma lagu ogola inaad badasho rakibaada joogtada ah ama dib u dhisid lagu sameeyo qalabkan shaqada fududeeya. Haddii qalabkan shaqada fududeeya aad u isticmaasho qaab kale oo aan ahayn kii aad warbixintiisa heshay markaasi adiga ama waalidka ayaa mas'uul ka ah haddii uu dhaco shil.

Qalabkan shaqada fududeeya dib ayaa loo soo celinayaa marka baahidi loo qabay dhamaato, gudaha xilligi lagu heshiiyay ama haddii aad u gurto meel ka baxsan gobolkan xuduudihisa. Xitaa qalabka shaqada fududeeya ee jajibay ama gaboobay waa in dib loo soo celiyaa.

Marka qalabkan shaqada fududeeya isticmaalkiisu dhamaado waa in iyagoo si fiican loo soo nadiifiyay aad dib ugu soo celiso:

Hjälpmedelscentralen, Fraktgatan 5 Eskilstuna.  
Hjälpmedelsfilialen Katrineholm, Kullbergska sjukhuset, Entré 2.  
Hjälpmedelsfilialen Nyköping, Spelhagsvägen 13  
Rugta caafimaadka ee ugu dhow ama degmada qaybteeda baxnaaniska.

Haddii aad hayso wax su'aalo ah ama u baahantahay adeeg la xiriir hjälpmedelscentralen oo laga helayo 0771-405 406.